



# Macluumaadka Talaalka COVID-19 ee shaqaalaha beeraha ee ku nool Oregon

- Soogalootiga iyo shaqaalaha beero xilliyeedka, shaqaalaha cuntada badda iyo beeraha, iyo shaqaalaha ka shaqeeya cuntada waxay bilaabi karaan qaadashada tallaalka COVID-19 Maarso 29.
- Oregon waxay helaysoo tallaalo badan toddobaad kasta, laakiin weli waxay qaadan doontaa waqti in dhammaan shaqaalaha beeruhu helaan tallaalka.

## Maxaan u qaadanayaa tallaalka?

- Tallaalku waa dariiq muhiim u ah inaad kaga ilaaliso naftaada iyo dadka aad jeceshahay COVID-19.
- Tallaalku wuxuu ka dhigayaa jirkaaga mid adag si uu ula dagaalamo COVID. Tallaalka kama qaadi kartid COVID-19.
- Tallaalku waa kahortag. Wuxuu ka ilaalinayaa inaad xanuunsato. Waxaad ku helaysoo tallaalka adigoo ka qaadanaya cirbad gacantaada oo aad ka helaysoo daryeel bixiyahaaga caafimaad.

## Tallaalka waa badbaado waana u bilaash qof kasta

- Saddexda tallaalka ee COVID-19 ee la oggolaaday in la isticmaalo waa la tijaabiyay si loo hubiyo inay badbaado iyo waxtar leeyihiin.
- Tallaalku waa u bilaash qof kasta oo ku nool Oregon. Lacag lagaama qaadi doono ballanta ama tallaalka.
- Qof kasta oo ku nool Oregon oo uqalma waa uu qaadan karaa tallaalka mana saamayn doonto xaaladdaada soogalootiga.
- Tallaalku ma beddelo DNA-gaaga kumana jiraan waxyaabo xayawaan ah.
- Tallaalka Johnson & Johnson waxay isticmaalan fayras inaga dhigaya inaan ka samaysano difaac COVID-19. Soo saarista fayraska tallaalka waxay u baahan tahay isticmaalka unugyo lagu koriyo shaybaadhada oo laga keeno unugyo laga soo qaaday nudo uur-jiif sannado badan kahor.

## Waxaad filanayso

- Tallaalada Pfizer iyo Moderna, waxaad u baahan doontaa laba cirbadood. Waxaad helayso kuurada labaad 3 ama 4 asbuuc kadib markaad qaadato tan koobaad. Waa muhiim inaad hesho labada kuuraba si talaalku u shaqeeyo.
- Tallaalka Johnson & Johnson wuxuu u baahan yahay kaliya hal durmo. Waa lagu ogeysiin doonaa nooca tallaalka aad qaadato iyo nooca la-socosho, haddii ay jirto, ee aad u baahan tahay.
- Markaad qaadato cirbada, waxaad ku yeelan kartaa xanuun gacanta meesha lagaa duray. Dadka qaarkood waxa kale oo ay dareemi doonaan daal ama qandho maalmo kooban. Tani macnaheedu maaha inaad xanuunsan tahay. Waxay ka dhigan tahay in talaalku shaqaynaayo si loo dhawro caafimaadka jirkaaga.

## Goormaan heli karaa tallaal?

- Haddii aad ka shaqayso beer, xarunta cuntada badda, ama xarun lagu soo saaro cunto, waxaad bilaabi kartaa qaadashada tallaalka Maarso 29.

## Halkee ayaan ka heli karaa talaalka?

- Goobaha ugu dhow ee tallaalka ayaa kala duwanaan doona iyadoo ku xiran halkaad ku nooshahay ee aad ka shaqayso.
- Kala hadal loo-shaqeeyahaaga wixii ku saabsan haddii ay qorshaynayaan inay qabtaan munaasibad tallaal.
- Haddii loo-shaqeeyahaagu uusan qabanayn munaasibad tallaal, waad awoodi kartaa inaad aaddo rugta caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama munaasibad uu maalgaliyay urur bulsho.
- Macluumaad dheeraad ah, tag [vacunacovid.oregon.gov](https://www.vacunacovid.oregon.gov) ama [covidvaccine.oregon.gov](https://www.covidvaccine.oregon.gov).

## Miyaan u baahanahay inaan muujiyo caddayn uqalmitaan ama aqoonsi?

- UMA baahnid inaad soo qaadatid caddayn uqalmitaan. Waa lagu weydiin karaa inaad ka shaqayso beer, xarunta cuntada badda, ama xarun soo saarta cunno.
- UMA baahnid lambarka amniga bulshada.
- UMA baahnid caymis caafimaad.

## Miyaa layga baahan doonaa inaan qaato tallaal?

- Loo-shaqeeyayaasha ayaa uga baahan kara shaqaalaha inay istallaalan, iyadoo laga reebayo xaaladaha qaarkood.
- Kala hadal loo-shaqeeyahaaga haddii ay u baahan yihiin tallaal iyo haddii kale.

- Haddii loo-shaqeeyahaagu u baahan yahay tallaal laakiin aad leedahay naafonimo ka hor istaagaysa inaad qaadato tallaalka, loo-shaqeeyahaaga ayaa u baahan kara inuu sameeyo meelayn iyadoo la waafajinayo Sharciga Naafonimada Dadka Maraykanka.

### Kheyraadka macluumaadka:

Macluumaad dheeraad ah, tag [covidvaccine.oregon.gov](https://covidvaccine.oregon.gov) (Ingiriisi) ama [vacunacovid.oregon.gov](https://vacunacovid.oregon.gov) (Isbaanish) ama wac 211 macluumaad ah luqad walba.

**Helitaanka dukumiintiga:** Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriis, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. Kala xiriiir Xarunta Warbixinta Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).